



Waxaan idinka soo salaamayaa Waterfront Seattle! Waad ku mahadsan tiihiin waqtiga aad maanta ku bixiseen in aad nagu soo biirtaan si aad wax ugu oggaataan Dekedyada (Pier) 58. Waxaan bixin doonaa guudmar heersare ah oo ku saabsan barmaamijka Waterfront Seattle ka-dibna waxaan u gudu gali doonaa mashruuca Dekedyarada (Pier) 58 si aan u bayaamino cunsurrada kala duwan ee nakh-shadda.




- Marka hore, waxaa idin siin doonaa raadraac yar oo ku saabsan barnaamijka Waterfront. Barnaamijka Waterfront wuxuu ka kooban yahay 15 mashruuc oo beddeli doonna habka ay dadka ku tagaan uguna wada-tacaamulaan biyo-xigeenka iyada oo ku mahadsan habka gaarista ee la sii wanaajiyay iyo barnaamijyada la kordhiyay.
- Waxaa laga yaabaa in aad dareentay shaqada dhismaha ee ka socota buundada biyo-

xigeenka ee ka bilaabanaysa Fagaaraha Pioneer ilaa Belltown. Kaasi waa waddada Alaskan Way ee cusub oo la qaabeynayo! Waxaa dib looga dhisi doonaa bariga meesha ay maanta ku taallo, raadka buunddadii la dumiyay 2019. Waxaa sidoo kale jiri doonna waddo weyn oo cusub oo biyaha xigta taas oo ay mari doonnaan dadka lugeynaya iyo dariiq baaskiil oo laba dhinacle ah oo ilaalsan kaas oo laga dhigi doonna dhanka galbeed ee waddadan cusub. Sii-wanaajintan ayaa gacan ka geysan doonta in biya-xigeenka uu noqdo meel soo-dhoweyn leh oo dadka oo dhan loogu talagalay.

- Isku-xirka magaalada iyo dhulkaan biya-xigeenka ah waa waxa kale ee weyn ee uu diiradda saari doonno barnaamijkan. Isku-xirrada bari-galbeed ee fagaaraha Pioneer Square ayaa fududeyn doonna in laga soo lugeeyo Degmada International District ilaa fagaaraha Pioneer Square, iyo Pike Pine Renaissance ayaa bixin doonta isku xirrada

bari galbeed ee u dhaxeeya Biyo-xigeenka (Waterfront), bartamaha dhexe ee magaalada iyo Capitol Hill. Waddaa Overlook Walk ayaa sidoo kale gacan ka geysan doonna fududeynta gaaristan, iyada oo bixinaysa xiriir toos ah oo u dhaxeeya suuqa iyo dhulka biyo-xigeenka ah.

DEGAANKA BARNAAMIJKAA WATERFRONT SEATTLE



- Barnaamijka waterfront (dhulka biyo-xigeenka ah) ayaa sidoo kale ku lug leh abuurista barxado dadweyne cusub oo la sii wanaajiyay, oo ay ku jiraan Dekedyada (Pier) 58 iyo Dekedyarada (Pier) 62, halkaas oo qoysasku ay awoodi doonnaan in ay ku maaweelaan oo ay kaga qaybqaataan dhacdooyin kala duwan. Dekedyarada (Pier) 62, oo ku taalla waqooyinka meesha kalluunka iyo xayawaan badeedka lagu

xannaaneeyo (Aquarium), ayaa dadweynaha loo furey bishii Sibtembar 2020 waxaanna Dekedyarada (Pier) 58 la filayaa in dib-u-dhiskeeda la bilaabo dabayaaqada sannadka 2022. Haddaba, aynu soo dhoweyno sanduuqa basaliga ah.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Dekedyarada (Pier) 58 waxay ku taallaa inta u dhaxeysa Dekedyarada (Pier) 57 iyo meesha kalluunka iyo xayawaan badeedka lagu xannaaneeyo (Aquarium) ee jirta waxayna leedahay qaab xoogaa u eg kabaha fardaha. Wuxaan bilownay in aannu meesha ka saarno dabayaqaadii xagaaga 2020 iyada oo sabab u ah in xaaladda dhismaha ay ka sii dartey.

WAXQABADYADA DEKEDYARADA (PIER) 58



- Inta aynu sii horumarinayno nakh-shadda, qiiamaha ugu weyn ee kooxdeenna oo dhan waa sida uu qof kasta ee bulshadeenna ka mid ah u adeegsan doonno beerta. Wuxaan doonaynaa in aan arrinta kaa maqalno!

DEKEDYARADA (PIER) 58



Fikradaha qaar oo aynu horey u sahaminay waxaa ka mid ah suuqyada beeralayda ama suuqyada kale ee bulshada.

DEKEDYARADA (PIER) 58



Waxaan sidoo kale ka hadalnay bandhig
faneedyo yaryar, qoob-ka-ciyaar ama
waxqabadyo kale.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Waa tan nakh-shadda hadda.
- Nakh-shaddan 60% ee la cusboonaysiiyay ayaa waxay abuureysaa dekedyarada (pier) oo aad loo gaari karo oo leh isku-xirro isku heer ah oo u dhaxeeyaa Dekedyarada (Pier) 57, meesha kalluunka iyo xayawaan badeedka lagu xannaaneeyo (Aquarium) iyo waddada cusub ee biyaha xigta.
- Waxay yeellan doontaa qaab saddex-geesle ah waxayna ka kooban tahay dhowr cunsur,

oo uu ku jiro goob-ciyaareed cusub, fagaare furan oo barnaamijyo loogu talagalay, koox geedo ah oo loogu talagalay in harkooda la fadhiisto iyo caws sare loo qaadey oo loogu talagalay in lagu nastro oo daawashadiisa lagu raaxaysto.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Waxaa jiri doonna dhabbayaal fidsan oo toos ah loona maro Dekedyarada (Pier) 57 oo ku yaalla bartamaha dekedyarada iyo cirifka galbeed.
- Waxaa sidoo kale jiri doonna laba kaabad, mid ku taalla heer boqolkiiba 4 ah oo fidan oo tagta kooxda geedaha ah ee ku yaalla dhanka waqooyi-bari, iyo mid ku taalla heer boqolkiiba 4.5 ah oo dhankeeda koonfureed la siman cawska sare loo qaadey.

- Intaa waxaa dheer, cawsku in uu leeyahay dhowr meelood oo fidsan oo saamaxaysa in loo gudbo goobaha la fadhiisto ee ku yaalla dhanka waqooyi.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Sawirkan wuxuu bixinayaa aragtida kale ee cawska sare loo qaaday iyo dhabbaha taga Dekedyarada (Pier) 57 ee ku yaalla cirifka biyaha iyada oo waddada dhinac marta biyahanna ay gadaal ku taallo.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Sawirkan wuxuu muujinaya muuqaal si fiican u muuqda oo ah marin fidsan oo lix-gacood ah oo u dhaxeeya meesha loo dhisay quruxda biyaha ee Fitzgerald iyo kooxda geedaha ah. Waxaa jira jaran-jarooyin dhowr ah oo taga Dekedyarada (Pier) 57 oo ku yaalla cirifka koonfureed.
- Si aad u tago geedaha, marka aad joogto kaabadka ayaa waxaad u leexan kartaa dhanka bidix, ama adeegso jaran-jarooyinka

la fadhiisto ee 18-inji ah.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Waxaa jiri doonna kuraas iyo miisas loogu talagalay dadku in ay ku raaxaystaan iyaga oo ku cuni kara raashiin ama ku akhirsan kara buug oo yaalla meesha ay ku yaallaan kooxda geedaha ah ee xoogaa harka leh.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Sawirkan wuxuu muujinaya muuqaal si fiican u muuqda ee marin laba-iyo-toban cag ah, ballaaran oo fidsan ee taga Dekedyarada (Pier) 57 oo u dhaxeeya kooxda geedaha iyo cawska sare loo qaadey, iyo fursadaha kala duwan ee wada fadhiisiga iyo isku imaatanka iyada oo lagu raaxaysanayo biyo-xigeenka.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Adiga oo cawska korkiisa jooga, ayaa waxaad awoodi doontaa in aad ku raaxaysato aragtida Gacan-biyoodka Elliott iyo Garaangarta La Raaco ee Great Wheel adiga oo eegaya galbeedka ama magaalada haddii ay noqon lahayd in aad dib u soo eegto bari.
- Waxaa sidoo kale jira jaran-jarooyinka hoos loogu dhaadhaco oo taga cirifka galbeed ee dekedyarada (pier).

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Sawirkan wuxuu muujinaya muuqaalka si fiican u muuqda ee cirifka waqooyi-galbeed ee cawska sare loo qaadey, kaas oo dhererka meesha ugu sarreysa qiyaastii noqon doonta afar cagood iyo nus, iyo marinka lagu tago Dekedyarada (Pier) 57 ee cirifka galbeed ee dekedyarada.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Waxaa jira fagaare furan oo ku yaalla bartamaha dekedyarada (pier) oo ay ka mid yihiin meel la fadhiisto waxayna bixinaysaa goob loogu talagalay barnaamijyada iyo dhacdooyinka yaryar.

DEKEDYARADA (PIER) 58



- Marka aan dib uga fogaanno, waxaad arki doontaa meel bannaan oo loogu talagalay goob-ciyaareed oo ku taalla dhammaadka waqooyi ee dekedyarada (pier). Fikradda goobtan ayaa weli la diyaarinaya. Waxa ilaa iyo hadda aan ognahay waa in ay noqon doonto meel xiran oo gacan ka geysanaysa in carruurta indhaha lagu hayo marka ay adeegsanayaan qalabka lagu ciyaaro.




- Hal shay kale oo dheeraad ah oo aan jeelaan lahayn in aan dad la wadaagno ayaa ah goob adeeg iyo musqul cusub oo ku yaalla waddada biyaha xigta ee dhinaca kale ee dekedyarada (pier). Waxaa jiri doonna dadka ka adeeggaa musquusha oo waqtii kasta jooga musqulahana si joogto ah ayaa loo nadiifin doonnaa maalintii oo dhan.

WAQTIYADA



CONSTRUCTION SCHEDULE



- Waa kan jadwalkeenna hadda.
- Dekedyarada (Pier) 58 waxay ku jirtaa marxalad nakh-shadeyn waxayna gaartey nakh-shadda 60% bartamihii-Sibtembar waxaanna la qorsheynayaa in la gaaro 90% nakhs-shadda horaanta sannadka 2021. Dhismaha ayaa sidoo kale la filayaa in uu bilowdo dabayaqaqada 2022 wuxuunna qiyaastii qaadan doonna laba sano in lagu dhammeeyo.



SU'AALO?

Nagala soo xiriir:
info@waterfrontseattle.org
206.499.8040
waterfrontseattle.org



- Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan nagala soo xiriir info@waterfrontseattle.org ama lambarkan telefoonka 206-499-8040
- Wuxaan sidoo kale booqan kartaa mareegtadeenna waterfrontseattle.org